



## GUDDI-HOOSAADKA DEEGAANNADA

### WAKIILLADA QURBE-JOOGTA

- Maxamed Jaamac Warsame
- Cumar X.Aadan Cigaal
- Cumar Axmed Farogod
- Nimco Cumar Caateeye

### SHAQADA AMA HAWSHA LOO WAKIISHAY

1. Abaabulka ololaha wacyigelinta **qurbe-joogta**
2. Baraarujinta **qurbe-joogta** aan weli bixinin qaadhaanka.
3. Diiwaangelinta **qurbe-joogta** aan ururka xubin ka ahayn.

### WAKIILLADA DEGM. HARGEYSA

- Cumar Muuse Caalin
- Xamse Maxamed Cisman Bodhle
- Sayid Cabdi Jimcaale
- Maxamed Axmed Warsame
- Guuleed Xasan Carte
- Sakariye Cabdilaahi Nuux

### SHAQADA AMA HAWSHA LOO WAKIISHAY

1. Abaabulka ololaha wacyigelinta degmooyinka **Hargeysa**.
2. Baraarujinta xubnaha **Hargeysa** degen ee aan weli bixinin qaadhaankii ururka.
3. Diiwaangelinta dadka degen **Hargeysa** ee aan weli ururka xubin ka noqonin.
4. Hubinta iyo Diiwaangelinta ardeyda degen **Hargeysa** ee rabta in ay ka faa'iideystaan barnaamijka waxbarasho ee ururka.

### WAKIILLADA DEG. DAARASALAAM

- Maxamed Siciid Aadan Gubadle
- Maxamed Maxamuud Dibbad

### SHAQADA AMA HAWSHA LOO WAKIISHAY

1. Abaabulka ololaha wacyigelinta degmada **Daarasalaam**.
2. Baraarujinta xubnaha degmada **Daarasalaam** ee aan weli bixinin qaadhaankii ururka.
3. Diiwaangelinta dadka degmada **Daarasalaam** ee aan weli ururka xubin ka noqonin.
4. Hubinta iyo Diiwaangelinta ardeyda **Daarasalaam** ee rabta in ay ka faa'iideystaan barnaamijka waxbarasho ee ururka.

### WAKIILLADA DEGMADA GEBILAY

- Yaxye Cabdi Cabdilaahi
- Maxamed Muuse Cumar
- Nimco Muxumed Warsame

### SHAQADA AMA HAWSHA LOO WAKIISHAY

1. Abaabulka ololaha wacyigelinta degmada **Gebilay**.
2. Baraarujinta xubnaha degmada **Gebilay** ee aan weli bixinin qaadhaankii ururka.
3. Diiwaangelinta dadka degmada **Gebilay** ee aan weli ururka xubin ka noqonin.
4. Hubinta iyo Diiwaangelinta ardeyda **Gebilay** ee rabta in ay ka faa'iideystaan barnaamijka waxbarasho ee ururka.

Sida uu dhigayo Qodobka 1.2<sup>aad</sup> ee XEER-HOOSAADKA XIDHIIDHKA IYO WACYIGELINTA Jul/2024 "xubnaha ka diiwaangashan Degmooyinka Hargeysa, Degmada Gebilay iyo Degmada Daarasalaam, waa in 10-kii xubnood ee meel wada degan ba la isku xidho, kadibna loo sameeyo gudoomiye"

Si hawlihii ururku u noqdaan kuwo xidhiidhsan, oo dhamaan xubnaha ururku ay si wada-jir ah uga wada qayb-qaateen, guddi-hoosaadkan shaqadoodu waxay noqonaysaa sidan:

## 1.2) XIDHIIDHINTA HAWLAHA URURKA

- ✓ Guddi-hoosaadyadu shaqo ahaan Xidhiidhiyaha ururka ayay hoos tagayaan.
- ✓ Hawlaha ay u xil-saaran yihiin guddi-hoosaadyaduna waa:
  - Waa in xubin kasta degmadiisa ardeyda degan, ee u baahan in waxbarashada laga caawiyo, uu soo ogaado oo soo xaqiijiyo in ardeygaasi yahay mid buuxiyay shuruudihii ururku ardeyda ku qaadanayay, xogtoodana u soo gudbiyo guddoomiyaha guddi-hoosaadka uu ka tirsan yahay, taasi oo ka dhigan in aan ururku aqbalaynin ardey cid kale waddo, oo aan la soo ogeysiinin guddi-hoosaadka degmada ardeygu ka yimid, si ay u soo xaqiijiyaan in ardeygu buuxiyay shuruudihii ardeynimo ee ururka u yaalay.
  - Waa in xubnaha guddi-hoosaad kasta ay ka qaybgalaan ololaha diiwaangelinta ee degmadooda, isla markaana ay ololahaasi kala shaqeeyaan, oo la abaabulaan xidhiidhiyaha ururka.
  - Si loo fududeeyo gudbinta xogaha iyo halka ururka hawlihiisu marayaan, waa in xidhiidhiyuhu uu guddi-hoosaad kasta guddoomiyahooda u diro fariimaha muhiimka ah ee ururka, guddoomiyaha guddi-hoosaadkuna waa inuu fariimahaasi u sii gudbiyo 10-kii xubnood ee guddiisa, waxaana ka mid ah:
    - Fariinta soo-bixiya qaadhaanka marka la gaadho xilligii
    - Fariinta ka-qaybgalka ololaha diiwaangelinta
    - Fariinta ka-qaybgalka shir-weynaha iyo kullannada
    - Iwm...

# **WAAXDA XIDHIIDHKA IYO WACYIGELINTA URURKA**

1. Xidhiidhiyaha iyo guddi-hoosaadka deegaannada, oo noqonaya waaxdii xidhiidhka iyo wacyigelinta ururku, waxay xilkooda u gudanayaan sida uu dhigayo Xeer-Hoosaadka Xidhiidhka iyo Wacyigelinta, kaasi oo soo baxay July/2024

## **HAB-U-SOCODKA SHAQADA XIDHIIDHIYAHA (SOP)**

2. Waa inuu bil kasta:
  - a. Ururka ku soo daro ugu yaraan 1-xubin, isla markaana xubinta inta aanu diiwaangelin,
    - i. Waa inuu Ururka Laasduure iyo ujeedooyinkiisa, hadal uga sheego ama qoraal faahfaahsan ugu diro,
    - ii. Waa inuu qaadhaanka laga rabo iyo noocyadiisa hadal ama qoraal cad ugu sheego,
    - iii. Waa inuu ogolaanshaha qofka ku diiwaangeliyo, marka qofku ku qanco ururka,
  - b. Ururka Laasduure iyo ujeedooyinkiisa, uu hadal ama qoraal ugu gudbiyo, ugu yaraan 5-qof,
    - i. Waa inuu qof kasta oo uu fariinta u gudbiyay, uu ku daro foomka wacyigelinta xubnaha aan ururka ku jirin ee website-keena,
3. Waa inuu bilaha May iyo November, uu toos ula xidhiidho xubnaha 6-bilood iyo Sanad ku bixinaya qaadhaanka, oo foomka cabashada ku daro jawaabtooda.
4. Bil kasta maalinka 1aad:
  - a. Waa inuu website-ka kala soo dego:
    - i. Warbixinta dhamaan xubnaha bille ku bixinaya qaadhaanka,
    - ii. Warbixinta dhamaan xubnaha 6-bilood ku bixinaya qaadhaanka,
    - iii. Warbixinta dhamaan xubnaha sanad ku bixinaya qaadhaanka,
  - b. Waa inuu degmo kasta wakiiladeeda u diro, warbixinta xubnaha degmadaasi ee bille ku bixinaya.
    - i. Waa in wakiil kastaa xubnaha degmadiisa ee bille ku bixinaya, uu u sameeyo whatsapp-group u gaar ah intoodaasi, oo uu fariimaha kula wadaago,
    - ii. Waa in wakiilada deegaannada iyo xubnuhuba:
      - Ardeyda u baahan in waxbarashada laga caawiyo ee degmadooda ku nool, xogtooda u gudbiyaan Xidhiidhiyaha,
      - Reerkeena inta degmadaas ku nool, qaadhaankana bixin karta, ee aan ururka ku jirin, xogtooda ay u soo gudbiyaan Xidhiidhiyaha,
  - c. Waa inuu fariintii qaadhaan-bixinta bisha ee Khasnajigu baahiyay, uu u gudbiyo dhamaan wakiilada degmooyinka ee guddi-hoosaadka deegaannada.
  - d. Waa in wakiil kastaa uu toos ula hadlo xubnaha bille ku bixinaya ee degmadiisa, una sheego:
    - i. Inuu yahay wakiilkii degmada ee Ururka Laasduure,
    - ii. In fariimaha uu whatsapp-yadooda ugu diro ay uga soo jawaabaan,
    - iii. Iyo in ay hore u soo bixiyaan qaadhaankii bisha,
5. Waxa uu magacaabi karaa wakiilo gaar u ah, xuuraanka ardeyda waxbarasho u baahan, iyo soo helida reerkeena inta qaadhaanka bixin karta ee aan ururka ku jirin.
6. Jimce kasta marka uu Khasnajiga ka helo warbixinta billeyaasha ilaa Jimcahaasi soo bixiyay:
  - a. Waa inuu degmo kasta wakiiladeeda u sheego xubnaha aan weli soo bixinin,
  - b. Waa in wakiil kastaa:
    - i. Xubnaha degmadiisa ee aan weli soo bixinin, uu fariin ugu diro whatsapp, una sheego inay soo bixiyaan qaadhaankii bisha.

- 7. 25 ilaa 29-ka bisha:**
- a.** Waa in uu wakiil kasta u gudbiyo fariintii dhamaadka bisha, oo ka kooban:
    - i.** Hordhac khuseeya mahadnaqa wakiilada iyo shaqada ay ururka u hayaan,
    - ii.** Nuxurka oo xusaya bixinta qaadhaanka iyo muhiimada uu ururka u leeyahay,
    - iii.** Gunaanadka oo uu ka muuqdo magaca Xidhiidhiyaha oo sadexan + Xilkiisa,
  - b.** Wakiil kastaa:
    - i.** Waa inuu toos/call kula hadlo xubnaha degmadiisa aan weli soo bixinin, oo weyddiyo sababta ay u soo bixin waayeen,
    - ii.** Waa in foomka cabashada xubnaha uu ku soo diiwaangeliyo, wixii ay ugu soo jawaabeen xubnihii aan weli bixinin qaadhaanku,
- 8. 30-ka bisha:**
- a.** Waa inuu foomka cabashada wakiilada ee website-ka uu soo geliyo:
    - i.** Wakiilada aan shaqadoodii ka soo bixin,
    - ii.** Ama aan foomkii cabashada xubnaha soo gelinin website-ka,
  - b.** Waa inuu website-ka kala soo dego:
    - i.** Warbixinta dhamaan xubnaha diiwaangashan,
    - ii.** Warbixinta cabashada xubnaha,
    - iii.** Warbixinta cabashada wakiilada,
    - iv.** Warbixinta dadka aan ururka ku jirin, ee ay fariintii ururku gaadhay,
  - c.** Waa inuu warbixinahaasi u diro Guddoomiyaha, Gud.Xigeenka iyo Xoghayaha.
  - d.** Waa inuu warbixinahaasi ku baahiyo whatsapp-groupka ururka.
  - e.** Waa inuu barnaamijka Wacyi-Gelinta Ururka ka jeediyo kalmad ku saabsan:
    - i.** Bishaasi xubnaha cusub ee ururka ku soo biiray ama fariintu gaadhay,
    - ii.** Bishaasi ardeyda cusub ee ururka loo diiwaangeliyay,
- 9.** Waa in Guddoomiyaha Guud uu xubnaha cabashadoodu faham dheeraad ah u baahan tahay, uu toos ula xidhiidho ama toos ula hadlo, oo ka wareysto cabashadooda.
- 10.** Waa in Guddoomiyaha Guud uu warbixinta cabashada wakiilada iyo ta xubnahaba u gudbiyo Xoghaynta Guddida Anshaxa iyo La-Xisaabtanka.
- 11.** Hadii uu Xidhiidhiyuhu hayo cabasho ama tabasho, wuxuu ku soo qorayaa foomka cabashada guddida, sida:
  - a.** Hadii xubin guddida ah uu gef ama gaabis shaqo ka tirsanayo,
  - b.** Hadii shaqadu ku badan tahay,
  - c.** Hadii shaqada ama xilka uu rabo inuu joojiyo,
  - d.** Iyo nooc kasta oo cabasho ama tabasho ah,
- 12.** Waa inuu Guddoomiyaha Guud kala tashado magacaabista guddi-hoosaadyada Waxbarashada iyo Deegaannada, xubnaha uu ku darayo-na ogolaanshahooda tixgeliyo.



Ahmed koosaar Cismaan  
Xidhiidhiyaha Ururka Laasdhuure